SAFERWORLD
PREVENTING VIOLENT CONFLICT. BUILDING SAFER LIVES

Somali Women Development Centre SWDC

gaps uk
gender action for peace and security

Hadda iyo Mustaqbalka

Sinnaanta Jinsiga, Nabadda iyo Ammaanka ee Dunida COVID-19

Warbixin Kooban oo ku saabsan Soomaaliya

1. Hordhac

Raadka uu leeyahay COVID-19 waa mid si qoto dheer ula xidhiidhsan arimaha jinisga ee Soomaaliya. Waxa aad muhiim u ah in la sameeyo lafo-gur ku sar go'an jinsiga (gender-sensitive) si loo fahmo sida uu COVID-19 ula xidhiidho waxyaabaha ku wareegsan khilaafyada iyo si loo qiimeeyo raadaynta aan loo sinayn ee fayrasku ku leeyahay dadka iyo bulshooyinka ku nool goobaha nugul ee khilaafku saameeyey, iyo si ku sallaysan aqoonsiyadooda is dhexgala (oo ay ka mid yihiin jinsiga, isirka, qoomiyadda, naafanimada, dabaqadda, da'da iyo heerka bulsho-dhaqaale). Waxa sidoo kale muhiim ah in la fahmo sida baahiyaha iyo xuquuqaha haweenka iyo hablaha looga dhigi karo xudunta fal-cellinta iyo hawlaha caalamiga ah ka soo kabashada ee mudada dhow iyo mudada dheer iyo sidii loo kobcin lahaa ajandahaha haweenka, nabadda iyo amaanka. Xarunta Horumarinta Haweenka Soomaaliyeed (Somali Women Development Centre (SWDC) iyo Hay'adda Saferworld waxa ay si wada jir ah uga shaqeeyeen in la soo saaro lafo-gur jinsi oo duruufta ku sar go'an oo lagu sameeyo COVID-19. Waxa ay la tashadeen 20 urur oo kala jooga dawladaha xubnaha ka ah dawladda federaalka Soomaaliya: afar ka shaqeeya Koonfur Galbeed, shan gobolka Banaadir ah, laba Hirshabeelle ah, laba Galmudug ah, sadex Puntland ah iyo afar Jubaland ah.[1] Markii la faaqiday jawaabahooda, waxa la qabtay isku imaatin lagu ansixinayo oo ay yimadeen dhamaan ka soo qaybgalayaasha oo ay ku jiraan lix urur oo hore uga gayb qaatay waraysiyadii la qaaday xiligii xog ururinta. Qoraalkan waxa lagu soo bandhigayaa waxyaabihii ka soo baxay iyo talo-soo jeedimihii la sameeyey.

2. Koobniinka natiijada

Soomaliya waa bulsho ragga ku dhisan (patriarchal) oo hubaysan oo leh hab-fekerro iyo doorar si qoto dheer ugu xidhiidhsan jinsiga. Xadgudubyada ku sallaysan jinsigu aad ayay u sareeyaan, kuwaas oo ay ka mid yihiin gudniinka hablaha (FGM), guurka caruurta, iyo

[1] For safety reasons the participant organisations are not named in this report, but project partners are grateful for their time, knowledge and expertise.

guurka qasabka ah iyo rabshadaha iyo xadgudubyada qoyska. Haweenku dibedda ayay ka joogaan dhamaan heerarka iyo goobaha dawladeed iyo kuwa kale ee bulsho (informal) ee go'aanada lagu qaato, islamarkaana waxa jira sinaan la'aan wayn oo ku dhexjirta qaab dhismeedka bulsho-dhaqaale. Xaaladdu way ku sii xun tahay haweenka da'da yar, haweenka qaxoontiga ah, haweenka dalka gudihiisa ku baro-kacay, iyo haweenka ka soo jeeda kooxaha la faquuqo (marginalised groups).

Raadka uu ku leeyahay saf-mareenka COVID-19 haweenka iyo hablaha Soomaaliyeed waa mid xooggan. Waraysiyada la qaaday, haweenka iyo ururada haweenku waxa ay muujiyeen walaaca ay ka qabaan sida COVID-19 uu u baabi'in karo guulaha ay hore uga gaadheen sinaanta jinsiga, iyo ilaalinta haweenka iyo hablaha, oo ay ka mid yihiin inay si micno leh u helikaraan caddaalad iyo ilaalin. Markii laga fal-cellinayay COVID-19, xuquuqaha iyo baahiyaha haweenka iyo hablaha lama siin mudnaan islamarkaana haweenka u dhaq-dhaqaaqa arimaha haweenka iyo ururada haweenka waxa laga reebay qorshaynta iyo fullinta fal-celilnta ramsiga ah ee laga sameeyo COVID-19. Taasi waxa ay dhashay in inta lagu jiro COVID-19, si la mid ah xiisadaha kale, inay kor u kaceen takoorka iyo riiixista haweenka iyo hablaha lagaga sameeyo dhamaan qaab-dhismeeydada jira ee bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeed.

Cadaymaha caalamiga ah waxa ay muujiyeen in haweenka iyo hablaha ay si aan loo sinayn u saameeysay hoos u dhaca dhaqaale iyo xiisadda, islamarkaana inay ku adkaatay inay ka soo baxaan doorarka laga filanayo ee ah inay cunto iyo nafaqo ku soo biiriyaan qoyskooda.[2] Soomaaliya kama duwana, oo waxa haweenka iyo hablaha saaran cullayska u wayn ee saf-mareenkani keenay: waxa ay hayaan bad-qabka bulsho, waxa ay u qaybiyeen cuntada dadka ku jira goobaha aanay ka soo bixi karin, waxa ay daryeel siiyaan dadka buka oo waxa ay qaybiyaan qalabka la isku ilaaliyo, oo ay ka mid yihiin goobaha caafimaadka hooyada iyo dhalaanka. Waxa sidoo kale saaraan masuuliyado dheeraad ah oo daryeel oo ka yimi kor u kaca dadka u baahan daryeelka iyo dadka guryaha jooga oo sii badanaya sababta oo ah xanibaadaha isku socodka ee jira.

Soomaaliya ugu yaraan boqolkiiba 20 guryaha waxa madax u ah haween oo keena celcelis ahaan boqolkiiba 70 dakhliga qoyska,[3] taas oo badankeedku ka timaadda hawlaha laga qabto qaybta aan rasmiga ahayn (informal sector).[4] Saf-mareenka COVID-19 waxa uu si aad u wayn u saameeyey dakhliga haweenka sababta oo ah waxa la xanibay isku socodka, waxa la soo rogay xayiraado islamarkaana waxa badatay in guryaha laga shaqeeyo. Tusaale ahaan, talaabooyinka lagu doonayo in lagu xakameeyo COVID-19 ayaa ku soo rogay xayiraado duulimaadyada maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah taas oo saamaysay soo dejinta alaabta ay ka mid yihiin qaadka, khudaarta, midhaha, nacnaca iyo dharka, kuwaas oo ay badankooda iibiyaan haweenka Soomaaliya.[5] Bandowga habeenimo waxa uu si taban u saameeyey ganacsiga yaryar ee ay leeyihin haweenku sida maqaaxiyaha shaaha, kuwa

[2] IDLO (2020) 'COVID-19: pre-existing gender discrimination provides fertile ground for increased inequality, to the detriment of food security and nutrition', June (https://www.idlo.int/news/commentary/covid-19-pre-existing-gender-discrimination-provides-fertile-ground-increased)
[3] Ibid.
[4] DNS (n/d) 'Population composition and Demographic Characteristics of the Somali People. Volume 2' (https://www.nbs.gov.so/volume-2-population-composition-and-demographic-characteristics-of-the-somali-people/)
[5] Rift Valley Institute (2020) 'Khat and COVID-19: Somalia's cross-border economy in the time of coronavirus', May (https://riftvalley.net/publication/khat-and-covid-19-somalias-cross-border-economy-time-coronavirus)

cuntada iibiya, iyo tukaanada caanaha lagu iibiyo, kuwaas oo aan furi karin ganacsigooda habeenkii oo ah xilliga ay ugu suuq fiican yihiin. Taasi waxa ay keentay, in ganacsiyo badan oo ay haweenku leeyihiin ay si wayn u saamaysay oo ay soo gaadhay khasaare dakhli, iyo inay lumiyaan macaamiil, taas oo iyana raad taban ku keentay fayo-qabka qoysaskooda iyo bulshada guud ahaan. Waxa intaas dheer, COVID-19 waxa uu keenay hoos u dhac ku yimi lacagaha dibedda laga soo xawilo, iyo barnaamijyada caawimada ah ee sida gaarka ah ugu saabsanaa xoojinta hawlaha dhaqaale ee haweenka, taas oo ku keentay haween iyo qosyaskooda inanay hellin dakhli ama caawimo naf badbaadin ah oo la siiyo qoysaska danyarta ah (safety nets).[6]

Culayska dhaqaale, hakinta dugsiyada waxbarasho iyo xanibaadaha isku socodka bulsho waxa ay keeneen in Qaramada Midoobay iyo ururada Soomaalidu ay soo gudbiyaan warbixinno muujinaya kor u kaca ku yimi rabshadaha iyo xadgudubyada qoyska iyo noocyada kale ee xadgudubyada jinsiga ku sallaysan ee loo gaysto haweenka iyo hablaha oo ay ka mid yihiin dhiigmiirashada iyo tacaddiga galmo.[7] Hablaha yaryar ayay ku dhacday guurka caruurta, iyo guurka qasabka ah iyo gudniin (FGM), maadaama uu culayska dhaqaale ee soo wajahay qoysaska iyo xidhitaanka dugsiyadu ay u noqdeen fursad guddo dhaqameedka oo dib u bilawday gudniinka. Tani waxa ay xaqiiqdii ku tahay dib u dhac wacyigellin tobonaan sanadood la soo waday oo ku saabsanayd waxyeelada ay haweenka iyo hablaha ku leeyihiin dhaqamada waxyeelada leh. Isku socodka oo la xanibay iyo lacagaha la siiyo ka hortagga iyo ka fal-cellilnta xadgudubyada ku sallaysan jinsiga oo yaraaday ayaa minceheedu yahay in dadka ka badbaaday ay la halgamayaan sidii ay u helli lahaayeen adeegyada fal-cellinta xadgudbuyada jinsiga ku sallaysan ee ay bixiyaan ururada haweenka, islamarkaana waxa ay haystaan fursado yar oo ay dib ugu dhisi karaan noloshooda iyo hab nololeedkooda. Waxa intaas dheer, adeegyada caafimaadka iyo xuquuqda galmo iyo caafimaad ayaa xadidmay sababta oo ah qaybta caafimaadku waxa ay u leexatay ka fal-cellinta iyo ka hortagga saf-mareenka. Dawooyinka bakteeriyada lagula diriro, agabka la isku ilaaliyo, iyo dawooyinka kale oo yaraaday ayaa yareeyey suurtagalnimada ay ku helli karaan caawimo ku fillan ama daawayn naf badbaadin ah haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujiya, dadka u baahan ka dawaynta xanuunada galmada lagu kala qaado iyo dadka ka badbaaday xadgudbyada ku sallaysan jinsiga.

Inkasta oo ay ku qasbanaadeen inay ka fal-celiyaan hoos u dhaca ku yimi lacagaha ay helaan, iyo kor u kaca ku yimi baahiyaha iyo dalabka adeegyadooda iyo barnaamijyadooda, hadana ururada haweenku waxa ay weli safka hore kaga jiraan la dagaalanka saf-mareenka COVID-19 iyo ka fal-celinta xaaladaha kale ee degdegga ah sida abaaraha, daadadka, iyo ayaxa. Ururada haweenku waxa ay sii wadaan inay taageero siiyaan hawlaha muhiimka ah ee lagu taageerayo haweenka iyo qoysaskoodu inay helaan hab nololeed iyo khayraad; waxa ay bixiyaan adeegyo sharci oo aan lacag ahayn iyo adeegyo kale oo naf badbaadin ah oo ay siiyaan dadka ka badbaaday xadgudubyada ku sallaysan jinsiga oo sii kordhaya. Waxa ay sii wadaan inay u ololeeyaan sinaanta jinsiga, iyo tirtirista takoorka ku sallaysan jinsiga, tacadiga iyo xadgudubyada ku sallaysan jinsiga, ee bulshooyinka ay ka dhex shaqeeyaan

[6] OCHA (2020) 'Somalia Humanitarian Bulletin, 1 May - 2 June 2020', June (https://reliefweb.int/report/somalia/somalia-humanitarian-bulletin-1-may-2-june-2020)

[7] Saferworld (2020) 'Gender and COVID-19: responding to violence against women and children in Somalia', June (https://www.saferworld.org.uk/resources/news-and-analysis/post/884-gender-and-covid-19-responding-to-violence-against-women-and-children-in-somalia)

iyo sidoo kale in kor loo qaado ka qaybgalka haweenka ee geedi socodyada siyaasadeed – gaar ahaan doorashooyinka soo socda – iyo inay u halgamaan in dastuurka lagu daro qoondada haweenka ee boqolkiiba 30 ka ah. Ururada haweenku waxa ay sidoo kale laf-dhabar u ahaayeen in la hello xog sugan oo sax ah oo ku saabsan saf-mareenka COVID-19 oo ay helaan dhamaan shacabka (iyo in laga hortaggo xogaha beenta ah), gaar ahaan dadka ku nool goobaha miyiga ah ama kooxaha la faquuqo. Iyada oo ay jiraan doorkaas muhiimka ah ee ay ciyaaraan ururada haweenku, waxa ay xuseen inaan lagala tashan fal-cellinta ku saabsan COVID-19 ee Soomaliya, islamarkaana inaan la siin khayraadka ay ugu baahan yihiin sidii ay uga shaqayn lahaayeen ka soo kabashada iyo ilaalinta.

Ururada haweenka ayaa ugu haboon inay hogaamiyaan is-bedelka loo baahan yahay: waxa ay aqoon qoto dheer u leeyihiin duruufta iyo hab-fekerada bulsho iyo jinsi ee hagaha u ah sinaan la'aanta qotoda dheer iyo dheelliga awoodeed, iyo sidoo kale hababka wax looga qaban karo ee loo dhallan rogi karo kuwaas. Waxa ay fahamsan yihiin siyaabaha kala duwan ee xiisaduhu u saameeyaan bulshada qaybaheeda oo wax ay si waxtar leh uga fal cellin karaan baahiyaha bulshada oo ay ka mid yihiin baahiyaha haweenka iyo hablaha. Waxa ay khuburo ku yihiin la shaqaynta daneeyayaasha bulshada ee kala duwan iyo in si waxtar leh looga hortaggo khilaafka. Hawlaha ay qabtaan waxa ay ururada haweenku ay sidoo kale qayb ka qaadanayaan hagaajinta arimaha jinsiga iyo nabadda. Si shaqada ururada haweenku ay u noqoto mid sii socota, oo waari karta islamarkaana waqtigeeda joogta (badbaadisa nolol, oo kobcisa ajendaha mudada dheer ee haweenka, nabadda iyo amaanka) ee Soomaaliya, waa in si buuxda loo taageero si ay u helaan xasiloonni dhaqaale iyo shaqaale ku filan, hab maamul xoogan iyo habab maamul oo wanaagsan. Deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay kor u qaadaan taageerada maaliyadeed iyo farsamo oo ay fahmaan in doorkoodu yahay inay hubiyaan inay taageero siiyaan shaqada ururada bulshada rayidka ah/ururada haweenka hanaan waari kara oo mudo dheer ah.

3. Talooyin

Talo-soo jeedinta 1: Kor u qaadista ka qaybgal iyo metelaad minco leh oo ay haweenka iyo habluhu ku yeeshaan geedi-socodyada go'aan qaadasho ee rasmiga ah (formal decision-making processes)

Dawladda iyo hay'adaha Qaramada Midoodabay waa inay la tashadaan haweenka, hablaha, ururada iyo daladaha haweenka marka la qaadanayo dhamaan go'aanada la doonayo in si waxtar leh looga fal-celiyo oo looga hortaggo COVID-19. Waxa sidoo kale muhiim ah in lagu daro haweenka iyo ururada haweenka diyaargarowga xaaladda degdegga ah iyo hay'adaha iyo hababka ka fal-cellinta, iyo in la kobciyo ka qaybgal micno leh oo waara dhamaan heerarka go'aan qaadasho – oo ay ku jiraan aagaga gaarka ah, guud iyo siyaasadeed ee heer walba (guri, bulsho, dawladaha xubnaha ka ah federaalka, iyo heer qaran).

Iyaga oo si diblomaasi ah ula shaqaynaya dawladda Somalia iyo dawladaha xubnaha ka ah, deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay u doodaan in kor loo qaado ka qaybgalka haweenka ee ka fal-celinta iyo u diyaar garowga saf-mareenka (sida in la xaqiijiyo in ay isku dheelli tiran yihiin ragga iyo haweenka dhamaan kooxaha

qaata go'aanada ka fal-cellinta COVID-19 ee heer qaran iyo gobol). Waxa intaas dheer, ururada bulshada rayidka ah/ururada haweenka waa in sidoo kale lagu daro qorshaynta iyo kormeerka ka soo kabashada, maadaama ay iyagu ugu haboon yihiin inay ogaadaan baahiyaha degdegga ah ee bulshadoodu qabto.

Deeq-bixiyayaasha iyo ururrada caalamiga ah waa inay maalgeliyaan ururada xuquuqda haweenku sidii ay u helli lahaayeen lacago ay ku sii wadi karaan barnaamijyadooda, islamarkaana waa inay maalgeliyaan xoojinta awoodda ay u leeyihiin u doodista, iyo dhisidda dalado dhaqdhaqaaq. Xoojinta dhisidda dallado dhaqdhaqaaq ayaa ururada haweenka u saamaxaya inay kor u qaadaan awoodda ay si habaysan is-bedel ugu keenni karaan – oo ay ka mid tahay dib u habayn sharci. Deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ah waa inay taageero siiyaan dadaallada u doodista ee ururada haweenka guud ahaan inta lagu jiro xilligan muhiimka ah ee ku aadan kootada haweenka ee doorashada soo socota, in lagu daro kootada dastuurka ku meel gaarka ah iyo in Baarlamaaku ansixiyo Qabyo qoraalka Xeerka Xadgudubyada Galmo oo lagu bedelo Qabyo qoraalka Xeerka Sinada. Waa inay sidoo kale taageeraan u doodista ururada haweenka ee ku aadan in Dawladda Federaalka ah ee Soomaliya ay diyaariso Qorshe Hawleedka Qaran ee haweenka, nabadda iyo amaanka, ay si cad uga qaybgeliso haweenka iyo ururada haweenka geedi-socodyada go'aanada lagu qaato ee heer guud iyo dhamaan mawduucyada, ee aanay ku koobnaan uun arimaha saameeya haweenka iyo hablaha.

(cadayn buuxda oo ku saabsan talo soo jeedintan waxa laga helli karaa bogga 11 ee warbixinta dalka.)

Talo soo jeedinta 2: Wax ka qabashada waxyaabaha sababa xadgudubyada ku sallaysan jinsiga

Deeq-bixiyayaasha, Qaramada Midoobay iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay dejiyaan oo ay maalgeliyaan hab isku dhafan oo wax lagaga qabto xadgudubyada ku sallaysan jinsiga ee dhamaan qaybaha banii'adantinimo, horumar iyo nabad dhisidda. Habka caynkaas ah ee salka balaadhan waa in lagu daro ka hortagga xadgudubyada ku sallaysan jinsiga, ilaalinta iyo ka falcellinta, islamarkaana loo tixgelliyo adeegyada xadgudubyada ku sallaysan jinsiga kuwo nolol badbaadin ah oo daruuri ah, kuwaas oo ay ku jiraan xilliga lagu jiro COVID-19 iyo xiisadaha kale. Ururada xuquuqda haweenka waa in la siiyo deeq lacageed oo toos ah, oo ay ka mid tahay lacago aasaasi ah oo aan xadidnayn, si loo xaqiijiyo inay sii wadi karaan adeegyada dadka dhibtu ka soo gaadhay xadgudubyada ku sallaysan jinsiga (gaar ahaan xilliyada degdeg ah) iyada oo wax laga qabanayo arimaha keena ee xididka u ah iyo ka hortagga xadgudubyada ku sallaysan jinsiga iyada oo loo marayo hab isku dhafan oo sal balaadhan ee heer guri, bulsho iyo heerarka ka sareeya ah. Habkaasi waxa uu kobcinayaa in hoos loo dhigo ceebaynta (stigmatization) iyo xadgudubyada loo gaysto dadka ka badbaaday xadgudubyada ku sallaysan jinsiga iyo qoysaskooda islamarkaana in wax laga qabto waxyaabaha xididka u ah ee sababa xadgudubyada jinsiga – in la xoojiyo xidhiidhka ka dhexeeya hawlahaas iyo kuwa ku aadan inay dhallan rogaan hab-fekerka waxyeelada leh ee jinsi iyo bulsho, xoojinta in haweenku helaan hab nololeed iyo in kor loo qaado ka qaybgal micno leh oo ay haweenku ku yeeshaan go'aan qaadashada.

Deeq-bixiyayaasha, hay'adaha Qaramada Midoobay iyo kuwa isku duwidda sameeya waa inay kor u qaadaan taagerada la siiyo qaybta ilaalinta (protection sector) ee ku dhex jirta lacagaha fal-cellinta ee COVID-19 iyo xaaladaha degdegga ah, gaar ahaan kuwa ku aaadan xadgudubyada ku sallaysan jinsiga iyo ilaalinta caruurta. Waa inay taageeraan dhamaan heerarka dawladda si loo xaqiiiyo in adeegyada iyo fal-cellinta xadgudubyada ku sallaysan jinsiga ay noqdaan kuwo la helli karo xilliga lagu gudo jiro xanibaadaha iyo xayiraadaha kale ee lagu sameeyo dhaqdhaqaaqa, islamarkaana waa inay xaqiijiyaan in haweenka iyo hablaha ka tirsan dhamaan bulshooyinku ay ka war hayaan jiritaanka adeegyadaas, oo ay si fudud u helli karaan.

(cadayn buuxda oo ku saabsan talo soo jeedintan waxa laga helli karaa bogga 14 ee warbixinta dalka.)

Talo soo jeedinta 3: Kobcinta in haweenku helaan caafimaadka iyo xuquuqda taranka (sexual reproductive health and rights)
Qaramada Midoobay iyo dawladdu waa inay mudnaanta siiyaan helitaanka caafimaadka iyo xuquuqda taranka xilliyada ka fal-celinta xaaladda degdegga ah iyo qorshayaasha u diyaar garowga iyo qaybinta khayraadka (oo ay ka mid yihiin kuwa la xidhiidha COVID-19). Tan waa inay ku jirtaa xoojinta qaybta caafimaadka, hab ahaan iyo awood ahaan ba, si loo xaqiijiyo in haweenka iyo hablaha dhamaan qaybaha iyo kooxaha kala duwan ay si buuxda oo dhaqso ah u helli karaan adeegyo tayo leh, iyo sidoo kale in la xaqiijiyo in adeegyadu ay awood u leeyihiin inay ka fal-celiyaan sida wax u socdaan sida kor u kaca la sheegay inuu ku yimi gudniinka hablaha (FGM) iyo guurka caruurta, iyo guurka qasabka ah. In lacag la geliyo Xidhmada Adeegga u Yar ee Hore (Minimum Initial Service Package) ee wajiga u horeeya ee ka fal-cellinta xaaladda degdeg ah waa muhiim oo waa in khayraad lacageed loo qoondeeyo barnaamijyada caafimaadka iyo xuquuqda taranka galmo oo waa inaan loo leexin ka fal-cellinta COVID-19.

(cadayn buuxda oo ku saabsan talo soo jeedintan waxa laga helli karaa bogga 16 ee warbixinta dalka.)

Talo soo jeedinta 4: Xoojinta in haweenku marin u helaan caddaalad, ilaalin bulsho, kaalo iyo hab isku xidhan oo lagu taageero.
Dawladdu waa inay qorshayso oo ay xoojiso in haweenku marin u helaan caddalaada, siyaasadaha iyo hababka ilaalinta bulsho ee daboola baahiyaha gaarka ah ee haweenka iyo hablaha. Tan waa in lagu sameeyo taageerada deeq bixiyayaasha iyo Qaramada Midoobay, iyada oo lala tashanayo bulshada rayidka ah iyo ururada xuquuqda haweenka.

Deeq-bixiyayaasha iyo ururrada caalamiga ah waa inay kor u qaadaan taaageerada ay ka siiyaan ururada haweenka u doodista marin u hellidda caddaalada iyo siyaasadaha iyo barnaamijyada ilaalinta bulsho, iyo sidoo kale in haweenku ka mid noqdo hanaanka caddaaladeed. Deeq bixiyayaashu waa inay maalgeliyaan ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenka iyaga oo u marinaya deeq aasaasi ah iyo lacagaha xaaladda degdegga ah si loo xaqiijiyo inay sii wadi karaan hawlaha iyo ballan qaadyada ay hore u sameeyeen, iyaga oo sidoo kale taagero ka gaysanaya ka fal-cellinta COVID-19.

(cadayn buuxda oo ku saabsan talo soo jeedintan waxa laga helli karaa bogga 18 ee warbixinta dalka.)

Talo soo jeedinta 5: Kobcinta in haweenku helaan khayraad bulsho-dhaqaale iyo xoojinta ganacsiga haweenka

Deeq-bixiyayaasha, Qaramada Midoobay iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay taageero siiyaan dadaalka kor loogu qaadayo in haweenku helaan khayraad dhaqaale iyo kobcinta xuquuqaha iyo madax-banaanida dhaqaale ee haweenka – gaar ahaan haweenka dhaqaalohoodu hooseeyo iyo kuwa dalka gudihisa ku barokacay. Deeq bixiyayaasha, hay'adaha Qaramada Midoobay iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay la shaqeeyaan dawladda si loo kobciyo in haweenku helaan khayraad, tabobarro xirfadeed iyo xog ku saabsan ganacsigooda.

Waa inay dhamaantood kobciyaan in haweenku ka qayb qaataan barnaamijyada horumarineed ee mudada dheer, wax ka qabtaan arimaha xidida u ah ee sababa faqriga iyo in haweenka laga reebo [dhaqalaha] taas oo ay ka mid tahay in la wajaho hab-fekerka bulsho ee waxyeelada leh. Tani waxa ay u baahan tahay maalgellin mudo dheer ah (long-term) si loo xaqiijiyo in 'shaqada haweenka iyo ganacsiyada ay haweenku leeyihiin' aanay badankoodu ku sii jirin qaybta aan ramsiga ahayn (informal sector).

Deeq bixiyayaashu waa inay maalgellin badan geliyaan fal-cellinta siisa caawimo naf badbaadin ah oo la siiyo (safety nets) haweenka iyo ganacsigooda, iyo sidoo kale barnaamijyada lagu xaqiijinayo dakhli soo gala guryaha.

(cadayn buuxda oo ku saabsan talo soo jeedintan waxa laga helli karaa bogga 18 ee warbixinta dalka.)

Talo soo jeedinta 6: Xoojinta iyo taagerista ururrada iyo dalladaha xuquuqda haweenka

Deeq-bixiyayaasha iyo ururrada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay xaqiijiyaan in ururada iyo dalladaha xuquuqda haweenku ay ka badbaadi karaan xiisadan dhaqaale ee hada jirta, inay wax ka qabtaan habka lacag bixintu u socoto oo aan ahayn mid loo dhan yahay oo saamaysa ururada bulshada rayidka ah iyo ururada xuquuqda haweenka gaar ahaan, iyo inay awood u siiyaan ururada haweenku inay hogaamiyaan is-bedelka ay bulshooyinku doonayaan inay arkaan. Deeq-bixiyayaashu waa inay taageeraan ururada iyo daladaha xuquuqda haweenka iyaga oo siinaya lacago toos ah oo marshuucyada mudada dheer ah, iyo sidoo kale lacago daruuri ah oo xaqiijiya in horumarka ururka iyo awoodiisa la xoojiyo si uu u guto shaqooyinka aasaasiga ah (sida kormeerka, qiimaynta iyo waxbarashada, lacag raadinta, maamulka, maaraynta iyo hawlgalada). Marka ay la shaqaynayaan ururada xuquuqda haweenka, ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay: aasaasaan is-kaashi loo siman yahay oo mudo dheer ah oo ka baxsan marshuucyo gaar ah; inay isla naqshadeeyaan dhamaan barnaamijyada iyo miisaaniyadda; inay si siman u wadaagaan qarashka dheeraadka ah iyo ka maamul; inay siiyaan dhaqaale ururada aan dawliga ahayn ee maxalliga ah si ay u koraan urur ahaan islamarkaana inay fudaydiyaan inay si toos ah u helaan maalgelin lacageed; iyo inay xaqiijiyaan in barnaamijyadu ay ka fal-celiyaan is-bedeladda ay iyaga laftoodu tilmaameen inay yihiin daruuri.

(cadayn buuxda oo ku saabsan talo soo jeedintan waxa laga helli karaa bogga 20 ee warbixinta dalka.)

Talo soo jeedinta 7: Kor u qaadista maalgellinta qaybta caafimaadka iyo wax ka qabashada sinaan la'aanta caafimaad

Dawladda Soomaaliya, deeq-bixiyayaasha, Qaramada Midoobay iyo ururrada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay maalgeliyaan xoojinta nidaamka caafimaad ee Soomaaliya. Nidaamka caafimaadka guud waa mid liita oo aan awood u lahayn inuu wax ka qabto baahiyaha dadwaynaha, gaar ahaan xilliga lagu dhex jiro saf-mareenka. Waa inuu jiro dadaal dheeraad ah oo lagu baahinayo xogta ku saaban COVID-19 oo lagula dagaalamayo xogta beenta ah si looga hortaggo inuu faafo fayrasku. Qalab caafimaad, dawooyin iyo mihnadleyaal caafimaad oo tababar sare leh, waa in la siiyo cisbitaaladda guud xilli kasta, waana in la sii xoojiyo xilliga xiisaduhu jiraan. Gaar ahaan, waa inay maalgeliyaan dhisidda iyo horumarinta tas-hiiladka caafimaad ee goobaha miyiga ah oo aan gaar ahaan lahayn tas-hiilaadkaas iyo maamul goboleedyada dhowaan la sameeyey, sida Galmudug iyo Hirshabeelle.

Deeq-bixiyayaasha, hay'adaha Qaramada Midoobay, ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn iyo dawladdu waa inay u abuuraan fursado loo siman yahay haweenka iyo ragga si ay u helaan tabobarro lagu horumarinayo xirfadaha daryeelka caafimaad iyo shaqaale qorista qaybta caafimaadka si loo xaqiijiyo in haweenku ay ku yeeshaan metelaad siman hababka lagu qaato go'aanada daryeelka caafimaad.

Talo soo jeedinta 8: In xidhiidh lala sameeyo ragga iyo wiilasha si loo kobciyo sinaanta jinsiga iyo ilaalinta

Dalka Soomaaliya waxa haysta kuraasta awoodda leh ragga, heer guri iyo heer siyasadeed ba, sida kuwa siyaasadda ku jira, iyo hogaamiyayaasha dhaqan iyo siyaasadeed. Maadama oo ay leeyihiin awood iyo saamayn, waxa muhiim ah in xidhiidh lala sameeyo si loogu halgamo sinaan jinsi iyo xuquuqaha haweenka iyo hablaha. Waxa sidoo kale muhiim ah in lagala xidhiidho inay ka falceliyaan saamaynta taban ee uu safmareenka COVID-19 ku leeyahay haweenka iyo hablaha, iyo qorshaynta iyo fullinta fal-celinaha safmareenka ee lagu sar gooyay jinsiga.

Deeq-bixiyayaasha iyo ururrada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay taageeraan barnaamijyada fudaydiya in lala xidhiidho ragga iyo wiilasha si ay u noqdaan kuwa horyaalka u ah wax ka qabashada dhaqanada waxyeelada leh ee bulsho, dhaqan iyo diimeed, loo kobciyo sinaanta jinsiga iyo metelaadda haweenka iyo hablaha ee arimaha bulsho iyo siyaasadeed. Barnaamijyadu waa inay kor u qaadaan wacyigellinta ragga iyo wiilasha dhexdooda ah ee ku saabsan xuquuqaha haweenka iyo hablaha, sinaanta jinsiga, hab-fekerka jinsi ee waxyeelada leh iyo muhiimadda ay leedahay ka qaybgalka haweenka ee fagaarayaasha go'aan qaadashada. Shaqadu waa inay kaabis u noqoto dadaalada ku aadan sinaanta jinsiga ee aanay noqon mid lagu bedello shaqada socota ee lala wado haweenka iyo hablaha, maadama oo ay daruuri tahay in lala shaqeeyo ragga iyo wiilashu si aanay u sii xoojin xidhiidhada awoodeed ee aan jinsi ahaan sinayn, balse ay wax uga qabtaan.

4. Cidaha iskaashiga leh

Somali Women Development Center (SWDC) Xarunta Horumarinta Haweenka Soomaaliyeed (Somali Women Development Center) – oo loo soo gaabiyo SWDC – waa urur aan dawli ahayn oo aan wax faa'iido ah doonayn, oo la aasaasay badhtamihiii 2000. Tan iyo markaas, SWDC waxa uu la shaqeeyey ururo uu iskaashi la leeyahay oo badan, deeq bixiyayaal iyo dawlado oo ay ka mid yihiin hay'adaha Qaramada Midoobay, iyo ururo caalami ah, waxa uu u taagan yahay inuu fuliyo barnaamijyo iyo hawlo kobciya in haweenka iyo habluhu ay helaan xuquuq si loo xaqiijiyo inay ku yeeshaan door firfircoon bulshada Soomaaliyeed iyada oo la kobcinayo ka qaybgalkooda bulsho, siyaasadeed, dhaqaale iyo dhaqan.

Saferworld waa urur caalami ah oo madax-banaan oo ka shaqeeya ka-hortagga khilaafyada iyo dhisidda nolol badqabta. Waxa aannu la shaqaynaa bulshooyinka ay saameeyeen khilaafyadu si ay u kobciyaan badqabkooda iyo dareenkooda amni, islamarkaana waxa ay samaysaa cilmi baadhis iyo lafo-guris balaadhan. Waxa ay u isticmaashaa cadaymahaas in lagu horumariyo siyaasadaha iyo dhaqamada deegaan, qaran iyo caalamiba ee gacan ka gaysan kara dhisidda nabad waarta. Mudnaanta waxa ay siisaa dadka – waxa ay aaminsantahay aduun qof waliba uu ku noolaan karo nolol nabad ah oo guul leh, oo xor ka ah cabsi iyo ammaan darro. Saferworld Waa urur aan faa'iido doon ahayn oo ka shaqeeya 12 dal iyo geyi oo ku kala yaalla Afrika, Aasiya, iyo Bariga Dhexe.

Gender Action for Peace Security (GAPS) Ururka Hawlgalka Jinsiga ee Nabadda iyo Ammaanka (GAPS) waa daladda bulshada rayidka ah ee Ingiriiska ee ka shaqeeya arimaha Haweenka, Nabadda iyo Amaanka. Waxa xubno ka ah ururo aan dawli ahayn oo ka shaqeeya horumarka, xuquuqal insaanka, caawimada banii'adantinimo iyo nabad dhisidda. Waxa loo aasaasay si uu u kobciyo Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, oo ay ka mid tahay Qaraarka Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay ee tirsigiisu yahay 1325. GAPS waxa ay kobcisaa oo ay ku xisaabisaa Dawladda Ingiriiska ballan qaadyada caalamiga ah ee ay u qaaday haweenka iyo hablaha ku nool meelaha khilaafyadu ka jiraan ee dunida oo dhan.

Warbixintani waa mid madax-banaan oo uu taageeray islamarkaana maalgeliyay Xafiiska Dibedda, Barwaaqo Sooranka iyo Horumarka (the Foreign, Commonwealth & Development Office.) Qoraalkan waxa lagu maalgeliyay deeqda Boqortooyada Midowga (Ingiriiska) oo ka timi dawladda Boqortooyada Midowday (Ingiriiska), haseyeeshee, aragtida ku jirta daruuri maaha inay ka turjunto siyaasadaha rasmiga ah ee dawladda Boqrotooyada Midowday.

Warbixinta waxa maalgeliyay:

HM Government

SAFERWORLD
PREVENTING VIOLENT CONFLICT. BUILDING SAFER LIVES

Somali Women Development Centre SWDC

gaps uk
gender action for peace and security